Macluumaadka Maxbuuska iyo Ogeysiinta Siideynta

# Hadii qofka ku jiro xabsi

Si aad u ogaato xaaladda maxbuuska ku jira xabsi ama xarun xabsiyeed, ama aad u codsato in lagu ogeysiiyo sii deynta qof, la xiriir Minnesota VINE.

## www.vinelink.com

## 1-877-MN-4-VINE (1-877-664-8463)

**Ku saabsan Minnesota VINE**

- Shakhsiyaadku waxay isticmaali karaan Minnesota VINE si ay u ogaadaan haddii qof uu ku jiro xabsi gobol ama xarun xabsiyeed.
- Shakhsiyaadku waxay codsan karaan inay helaan ogeysiisyo wicitaan toos ah, iimayl, iyo/ama fariin qoraaleed.
- Shakhsiyaadka codsada in loo soo diro ogeysiisyo wicitaan ah waa inay bixiyaan lambarka telefoonka iyo PIN. Marka xaaladda maxbuuska isbedesho, isku dayada ogeysiinta waxay soconayaan 24 saacadood ilaa PIN la geliyo.
- Ogeysiisyadu waxay ku salaysan yihiin isbedelada xaaladda xabsiga oo ay ku jiraan sii deynta, wareejinta, baxsashada, ama dhimashada.
- VINE waa adeeg bilaash ah, qarsoodi ah, waxaana lagu heli karaa Ingiriis, Isbaanish, Soomaali, iyo Hmong.

# Minnesota VINE

Adeeg ay bixiso Xafiiska Barnaamijyada Caddaalad-da ee Minnesota. Wixii su'aalo ah oo ku saabsan Minnesota VINE, wac 800-247-0390.

Macluumaadka Maxbuuska iyo Ogeysiinta Siideynta

# HADDII QOFKA KU JIRO XARUN (Department of Corrections)

## Codsi Ogeysiis

Dhibbanayaasha iyo xubnaha dadweynaha waxay codsan karaan ogeysiisyada xaaladda xabsiga ee maxaabiista ku jirta xarun ka tirsan Waaxda Asluubta ee Minnesota (DOC) iyagoo adeegsanaya Haven, oo ay ku jiraan:

- Isbeddelada xaaladda xabsiga oo ay ku jiraan wareejinta, dhimista xabsiga, iyo codsiyada wareejinta gobollada kale.
- Ogeysiisyada sii deynta.
- Barnaamijyada sii deynta hore.
- Isbeddelada xaaladda kormeerka.
- Isbeddel ku yimaadda shaqaalaha kiisaska ama wakiilka kormeerka.
- Baxsashada maxbuuska iyo qabashadiisa

## Caawimo Kale oo Ay Bixiso Haven

Haven waxay bixisaa macluumaad iyo fursad lagu codsado caawinta qorsheynta amniga iyo badbaadada; soo sheegidda dabeecadaha xun ee joogtada ah ama ku xadgudubka amarada ilaalinta ee maxaabiista; la xiriirida shaqaalaha asluubta inta lagu jiro muddada xabsiga iyo kormeerka bulshada; weydiisashada magdhowga, iyo helidda macluumaad la xiriira dhammaan heerarka hannaanka asluubta.

## Abuur Akoonka Haven oo Codso Ogeysiis

- Foomka Haven waxaa laga heli karaa bogga DOC si loogu soo dejiyo, loo daabaco, oo loo gudbiyo: mn.gov/doc/victims.
- Wixii caawimo ah ee ku saabsan abuurista diiwaangelinta Haven, la xiriir Barnaamijka Caawinta Dhibbanaha iyo Cadaaladda Soo Celinta ee DOC lambarka 1-800-657-3830 ama iimayl u dir: victimassistance.doc@state.mn.us.

## Raadin Kaliya

Si aad u raadsato qof xiran, booqo bogga DOC: mn.gov/doc/family-visitor/search-individuals-fugitives

# Minnesota Haven

Adeeg ay bixiso Waaxda Asluubta ee Minnesota. Wixii su'aalo ah oo ku saabsan Minnesota Haven, wac 800-657-3830.